



Fursadaha Ardayda Aan Ka Qalin Jebinin Dugsiga Sare Muddo Afar Sanno Kaddib

Ardayda aan la kulmin sharuudaha qalin jebinta dugsiga sare IYO aan shaqeysanin dibloomada caadiga dugsiga sare waxaa loo ogol yahay waxbarashada bilaashka ee dadweynaha inta uu socdo sannad dugsiyeedka ay gaaraan 21 sanno. Tan waxaa ka mid ah ardayda ka yar 21 sanno ee shaqeystay shahaadada la mid ah shahaadada dugsiga sare ama ku qoran:

- Barnaamijyada shaqada iyo waxbarashada farsamada sida xarumaha laga barto xirfadaha;
- Barnaamijyada tababarka labada luqad ee ku meel gaarka ah;
- Barnaamijyada waxbarashada khaaska; AMA
- Barnaamijyada waxbarashada muhaajirka.

Dugsiyada sare iyo dugsiyada dagmooyinka waxaa u sii socda qaadashada Maal Gelinta Waxbarashada Aasaasiga (Basic Education Allocation) (BEA) iyo maal gelinta ay soo saaraan ardaydaan.

FURSADHA LACAG LA'AANTA AH

Fursadaha lacag la'aanta ah waxaa hela ardayda AAN ka qalin jebinin dugsiga sare muddo afar sanno kaddib, ee raba in ay la kulmaan sharuudaha qalin jebinta dugsiga sare. Fursadaha waxay yahiin:

- 1. Isku Qoridda Sii Socota ee Dugsiga sare:** Dhamaan ardayda waxaa loo ogol yahay in ay tagaan dugsiga sare xaafadda ay daggan yahiin inta uu socdo sannad dugsiyeedka ay gaaraan 21 sanno.
- 2. Isku Qoridda Barnaamijka Dhamaystirka Dugsiga Sare Dugsiga Dagmada:** Waxaa dhici karto in dugsiyada Dagmada ay heshiis la galaan kulliyadaha bulshada si ay ardayda weli ku qoran dugsiga dagmada ay daggan yahiin u siiyaan barnaamijyada dhamaystirka dugsiga sare ee lacag la'aanta ah. Kaddib marka ay dhamaystaan barnaamijka, ardayda waxaa la siiyaa dibloomada dugsiga sare ee dagmadaas.
- 3. Barnaamijka Bilaabidda Orodka (Continued Running Start):** Ardayda ka qeyb qaadatay Bilaabidda Orodka (Running Start) sannadaha darajooyinka 11aad iyo 12aad balse aan dhamaysanin fasalada looga baahan yahay qalin jebinta dugsiga sare waxay sii wadan karaan ka-qeyb galka Bilaabidda Orodka (Running Start), hase ahaatee waxay qaadan doonaan oo keliya fasalada Running Start ay ku dhaceen ama aysan dhamaysanin, loona baahan yahay si loo shaqeysto dibloomada dugsiga sare. (Barnaamijka Running Start wuxuu ardayda xaqa u yeesha, darajooyinka 11aad iyo 12aad, u ogol yahay in ay qaataan fasalada kulliyadda, wuxuu u ogol yahay in ay shaqeystaan buundooyinka dugsiga sare iyo kulliyadda, iyo in aysan bixinin kharashka waxbarashada.)

4. Albaabada Furan (Open Doors) [1418] Dib U Qaabilidda Dhalin Yarka (Youth Reengagement):

Waa barnaamij ama iskaashi ay waddo dagmada kana dhexeeyo dagmada iyo kulliyadda, ESD, ama urur ku saleysan bulshada ee bixiya:

- Tababarka waxbarashada sida diyaarinta shahaadadda la midka ah dugsiga sare, xirfadaha waxbarashada iyo kulliyadda iyo isu-diyaarinta shaqada, taasoo soo saarta buundooyinka dugsiga sare si loo qaato diblooma, ujeedadeeduna tahay isu diyaarinta waxbarashada iyo shaqada.
- Tababarka macalimiinta la siiyay shahaadadda ama tababareyaasha kulliyadda, kuwaasoo kulliyadda ay aqoonsatay aqoontooda.
- Maamulka kiiska, la-talinta iyo adeegyada ilaha iyo ku-toosinta.
- Fursadda la siiyo ardayda u qalanta in ay isku qoraan koorsooyinka kulliyadda, in lacag la'aan lagu siiyo kharashka ku baxa waxbarashada, haddii kulliyadda bixiso barnaamijka.

Si aad u heshid macluumaad badan, fadlan booqo:

www.k12.wa.us/GATE/SupportingStudents/StudentRetrieval.aspx

(sii socda)

Ardayda aan ka qalin jebinin dugsiga sare muddo afar sanno kaddib waxay kaloo helaan fursado laga bixiyo lacagta haddii ay doortaan in aysan ku soo noqonin dugsiga sare.

FURSADAHA LACAG BIXINTA

Fursadaha lacag bixinta waxaa hela ardayda AAN ka qalin jebinin dugsiga sare muddo afar sanno kaddib, oo raba in ay la kulmaan sharuudaha qalin jebinta dugsiga sare. Fursadaha waxay yahiin:

- 1. Isku Qoridda Barnaamijka Kulliyadda Bulshada iyo Farsamada iyo Dhamaystirka Dugsiga Sare:** Tiro ka mid ah kulliyadaha bulshada ee ku sugan gobolka ayaa bixiya barnaamijyada dhamaystirka dugsiga sare, iyaga oo ardayda siiya dibloomada dugsiga sare ee *laga qaato kulliyadda*. Ardayda waa in ay yahiin arday ka tagtay dugsiga sare meesha ay daggan yahiin si ay isugu qoraan barnaamijyadaan. Inta badan, ardayda waxaa laga qaadaa kharashka waxbarashada iyo khidmadaha isku qoridda, inkastoo kulliyadaha ay awood u leeyahiin in ay ka dhaafaan kharashka waxbarashada iyo khidmadaha laga qaado ardayda jirta 19 sanno ama ka badan. Ardayda jirta 16 ilaa 18 sanno waa in ay ogolaasho saxiixaan ka helaan dugsiga dagmada ay daggan yahiin si ay isugu qoraan barnaamijka dhamaystirka dugsiga sare ee kulliyadda bulshada.
- 2. Dabagalka Shahaadada La Midka Ah Dugsiga Sare:** Ardayda jirta 16 sanno ama ka badan waxay qaadan karaan shahaadada la midka ah dugsiga sare kaddib marka ay gudbaan imtixanaadka loo baahan yahay ee laga qaato barnaamijka dhamaystirka dugsiga sare. Si loo qaato imtixanaadka, ardayda waa in ay ku dhacaan ama ka noqdaan dugsiga sare ee ku yaala meesha ay daggan yahiin. Kulliyadaha bulshada iyo farsamada ee gobolka waa xaruumaha rasmi ahaan lagu qaado imtixaanka si loo qaato shahaadooyinka la midka ah dugsiga sare. Ardayda waxay bixiyaan khidmadaha imtixaanka (imtixanaadka), waxaana dhici karta in ay bixiyaan kharashka waxbarashada iyo khidmadaha diyaarinta koorsooyinka laga bixiyo kulliyadaha bulshada iyo farsamada. Shahaadada lama mid aha dibloomada dugsiga sare, iyo ardayda qaadata shahaadada la midka ah dugsiga sare waxaa loo haystaa in ay yahiin kuwo ka tagay xagga xisaabinta dugsiga sare. Hase ahatee, ardayda ka yar 21 sanno ee haysta shahaadada la midka ah dugsiga sare waxay weli fullin karaan sharuudaha qalin jebinta dugsiga sare iyo waxay qaadan karaan dibloomada. (Fiiri Fursadaha Lacag La'aanta No. 1 iyo 2 kor.)

- 3. Isku Qor Kulliyadaha ama Jaamacadaha Dad Weynaha ee Labada Sanno ama Afarta Sanno:** Washington lagama helo kulliyado iyo jaamacooyinka dad weynaha oo u baahan in ardayda haystaan dibloomada dugsiga sare si loogu ogolaado, inkastoo dibloomada dugsiga sare ay si weyn u kordhin doonto fursadaha gelitaanka machadaha afarta sanno ee gobolka. Ardayda aan haysanin dibloomada dugsiga sare ee isku qora kulliyadaha iyo jaamacadaha waxay bixiyaan kharashka waxbarashada iyo khidmadaha sida dhamaan ardayda kale. Waxaa dhici karto in ardayda aan haysanin dibloomada dugsiga sare ama shahaadada la midka ah dugsiga sare in aysan xaq u yeelanin in la siiyo kaalmada maaliyadda federaalka, gobolka iyo kaalmada maaliyadda gaarka.